

Sirdoonka Kenya oo maanta si aad ah u adkeeyey amaanka goobtii uu Ciidda ku tukanayey Sh Umal ayada oo Shacabkuna ay Cabasho ka muujiyeen arinkaas (Warbixin)

Written by Administrator on 19 August 2012.



Dowladda Kenya ayaa waxa ay u muujisay sida aadka ah ee ay uga taxadarayso nabad galyada qaar ka mid ah culimada Soomaaliyeed ee ayagu ku biiray safkeeda ku aadan la dagaalanka ku dhaqanka Shareecada Islaamka.

Kenya ayaa abaal marin balaaran gudoonsiisay Culimada Soomaaliyeed ee aalaaba u taagan Difaaca ciidamadooda ku duulay dalka Soomaaliya, dhanka kalena noqday Afhayeenada u dooda Kaniisadahooda, halka ay culimadaasi xili walbaa ku mashquulsan yihiin wax ka sheega mujaahidiinta Soomaaliya.

Maantay oo ay ahayd maalin Ciid ah, Ha'adaha amaanka dalka Kenya waxay si aad ah isaga xil saareen sugida amaanka goobaha ay ku suganaayeen qaybo ka tirsan Culimada Soomaaliyeed gaar ahaan Sheikh Maxamed Cabdi Umal oo hadda asagu si toos ah ugu biiray Safka Dowladda Kenya.

Marka la eego goobaha ay maanta salaadii Ciidda ku tukanayeen Madaxda iyo Siyaasiyiinta muslimiinta Kenya sida South C iyo Haligam waxay ahaayeen goobo ay si caadi ah xaaladeedu u daganaayeen, Dadkii muslimiinta ahaa ee goobahaas kusoo tukaday waxay salaadoodii u tukadeen ayaga oo aanan la kulmin wax baaritaan ah, sidoo kale

goobahaas kama muuqan dhaq dhaqaaq badan oo lagu sugayo amaanka madaxdii Kenyaatiga ahaa ee goobahaas ku sugnaa.

Xaalku waxa uu sidaas ka duwanaa **Sir Ali Muslim Club** oo ahayd goobtii uu salaadda ku Tojinayey Sheikh Maxamed Cabdi Umal, **SomaliMeMo** ayaa waxaa soo gaaray cabashooyin fara badan oo ku saabsan qaabkii loola dhaqmay dadkii goobtaas maanta u tagay in ay salaadda ku tukadaan.

Dharcadka Hay'adda Sirdoonka Kenya ayaa si xoog leh loogu daadiyey goobtii lagu tukanayey Salaadii Ciidda, waxayna arintaasi bilaabatay ka horba intii aysan bilaaban Salaadii iyo Khudbadii Ciidda.

Qof kasta oo goobta soo gaaray ayaa la baarayey, waxaana jiray dad badan oo ay Salaadii dhaaftay ka dib markii Hay'adaha amaanku ay baaritaan dheer kula kaceen dadkii goobta iskugu yimid taas oo mid mid ay u baarayeen dadkii Musaliinta ahaa, ayada oo Baaritaanku uu gaaray xataa in la baaro caruurta yar yar ee la socday waalidiintooda.

Si kataba ha ahaatee Dowladda Kenya ayaa aad u adkaysay nabadgalyada Sheikh Maxamed Cabdi Umal ayada oo Sheikhu horay ugu sheegay mid ka mid ah Muxaadaraad uu dhawaan qabtay in uusan lahayn wax waardiye ah, kaligiisna uu socdo.

Xaafadda lagu magacaabo **Burhaan State** oo ah halka uu magaalada Nairobi ka degan yahay Sheikh Umal oo ka kooban 83 guri ayaa la xaqijiyyey in Guriga Sheikh Umal uu yahay guriga kaliya ee leh aaladda **Electric Security** taas oo ah mid ay ku baxday lacag aad u badan,

arinkaas oo ka dhigan in guriga Sheikh Umal dhammaantiisba lagu wareejiyey Korantada lagu waardiyeeyo guryaha ayagu la adkeeyo amaankooda.

Isku soo duuboo taasi waxay meesha ka saaraysaysaa hadalkii Umal ee ahaa "**Cidna ima waardiyeysa, waardiyeena ilama socdo**" halka dhanka kalena ay muuqanayso in Dowladda Kenya ay si weyn ugu dadaalayso in ay koolkooliso culimada dhankeeda la safan ee ay ayagu jahwareerka ku rida mar walbaa shacabka ay Dowladda Kenya ka cabsanayso in ay kacdoon kala hor yimaadaan.

Hadaba miyeysan Habnoonayn in wadaadada galay Safka Kenya ay Rabbigood u soo laabtaan, umadana ka daayaan baadiyeeynta ay ku hayaan, miyeysan ogayn culimadaasi in Rabbigii Qabtay **George Saitote** uu ayagana qaban karo ayaga oo ku guda jira guryaha lagu wareejiyey **Electric Security**-ga, miyeyse sidoo kale ogayn in uu qaban karo Rabigii Qabtay Diyaaradihii Afarta ahaa ee ay Uganda usoo dirtay dalka Soomaaliya?!!!

**SomaliMeMo waa Shabakad Soomaaliyeed oo Islaami ah oo ka madax badaan koox, urur iyo Xisbi, kumana hadasho cid gooni ah afkooda.**